

Waxa ay tahay inaad ka ogaato Fayraska Syncytial ee Neefsiga (RSV)



Ku dhawaad dhamaan caruurta waxay qaadaan caabuqooda RSV ga hargabka oo kale ah marka ay gaadhaan 2 jir.

RSV waxaa weeye fayras caam ah oo ku keena xanuuno dhallaanka iyo carruurtaba, waxaanu badanaa dhacaa bilaha jiilaalka. Laakiin, **mararka qaar RSV waxa uu noqon karaa mid daran, oo waxa uu saameeyaa hawo mareenada iyo sanbabada.**

Maxaa la iiga baahan yahay in aan ogaado?

Caruurta qaar waxay qabaan khatar badan oo caabuq aad u daran ah oo RSV ah.

Caruurta wakhtiga hore dhasha, iyo caruurta ka yar 2 sano jirka ee qaba xanuunada sanbabka qaar ama xanuunada wadnaha ee faafa (CHD), waxay ku jiraan khatar badan oo RSV-ka bronchiolitis ama burunkiito iyo in la dhigo isbitaal.

Caruurta qabta bronchopulmonary dysplasia (BPD) sidoo kale loo yaqaan Xanuunka Sanbabka Mudada Dheer (CLD) ee u baahan taageero neefsi (mishiinka neefsiga), ama ogsajiin dheeraad ah, waxay khatar badan ugu jiraan inay aad u xanuunsadaan.

Waa maxay astaamaha RSV?

Caabuqa RSV waxa uu ku bilaabmi karaa sida hargab caadi ah, oo astaamaha waxaa kamid noqon kara:

- Qandho
- Dawakhaad
- Qufac
- Diidmada wax cunista
- Duuf



Wax muhiim ah in la ogaado: RSV waxa uu kusii noolaan karaa meelaha la taatabto dhawr saacadood.

Miyaa RSV noqon kartaa mid aad u daran?

Haa. RSV waxa uu saamayn karaa sanbabka oo waxa uu keeni karaa oof ama bronchiolitis ta RSV. Waxaa muhiim ah in lala socdo astaamaha dheeraadka ah ee daran:

- Qufac aad u daran oo badan
- Mushkilad dhanka neefsiga ama dhakhso u neefsaso, hiiraag
- Cidiyo ama dabno buluug ah
- Oon (xafaayad qalalan, af qalalan)
- Mushkilad naas nuujin ama siinta masaasada
- Neefsiga oo yaraata ama joogsada (apnea) *Astaantan waxay u baahan tahay daryeel caafimaad oo dhakhso ah

Sidee ayuu RSV u faafaa?

- Marka la taabto, dhunkado, qufaco iyo hindhiso
- Meelaha saxmada ah ee dadweynaha, iyo isku imaatinada qoyska ama asxaabta

Waa maxay waxyaabaha aan samayn karo ee aan ku yarayn karo khatarta ilmahaaga?

- Farxalo kahor inta aanad taaban ilmahaaga
- Ha dhunkan ilmahaaga hadii aad qabto duray ama qadhqadhyo
- Waxa aad ka fogaysaa qof kasta oo xanuunsanaya ilmahaaga
- Iska ilaali meelaha saxmada ah sida daryeelka ilmaha, moolasha, ama meelaha ay iskugu yimaadaan qoyska ama asxaabtu
- Marna haku garab cabin sigaarka ilmahaaga (ama gudaha gurigaaga)

Waydii dhakhtarka ilmahaaga qaababka aad u yarayn karto khatarta caabuqa RSV iyo dhigista isbitaalka.

Muhiim: Mar kasta waxa aad la hadashaa dhakhtarka ilmahaaga hadii aad ka warwarsan tahay wixii astaamo ah, ama 911 wixii Xaalad Degdega ah, gaar ahaan hadii ilmahaaga uu qabo mushkilad neefsi ah.



Waanu u mahadnaqaynaa kaaliyaha dhallaanka ee Marianne Bracht, Dr. Bosco Paes, Rebecca Pearce, Kojo Mensah



Canadian Premature Babies Foundation
(Ururka Caruurta Wakhtiga Hore Dhasha ee Kanada)

Khayraadka macluumaad dheeraad ah:
www.canadianpreemies.org

